Hawlgalka Kaalmaynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOM)

Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u Qaabilsan Soomaaliya, Nicholas Haysom

Warbixin uu Ergeyga uu Siiyey Golaha Ammaanka ee ku Aadan Xaaladda Soomaaliya

3-da Janaayo 2019

Mahadsanid Mudane Guddoomiye,

Waxaan Soomaaliya imid 3-dii Oktoobar, waxaana si wanaagsan ii soo dhaweeyay mas'uuliyiin caan ah oo ka tirsan dowladda Federaalka iyo dowlad goboleedyada dalka.

Waxaan aad ula dhacay ajendaha dib-u-habaynta fog ee Dowladda Federaalka iyo sida ay uga go'an tahay hirgelinta dhaqan-galka ah iyada oo loo marayo khariidado fulineed oo ay degsatey qayb kasta oo ay khusayso. Soomaaliya waxay u baqooshey jihadii wanaagsanayd laakiin qalalaasaha siyaasadeed ee sii socda ayaa mararka qaar wadada ka weecin kara.

Bishii Disembar, IMF waxay soo gebagebeysay dib-u-eegistii ugu horreysay ee Barnaamijka Saddexaad ee Kormeerka Shaqaalaha, iyadoo xustay waxqabad lagu qancay oo ay samaysay Dowladda Federaalka. Iyadoo la qiraayo horumarka la taaban karo ee uu dalku ku tallaabsaday, Hab-hawleedka Iskaashiga Dalka ee Bangiga Adduunka ee 2019-22 ayaa furay maalgelinta Ururka Horumarinta Caalamiga ah iyada oo loo marayo deeqaha deymaha ka hor oo dhan $80 milyan si loo xoojiyo bixinta adeegga aasaasiga ah, horumarinta awoodaha maamulka maaliyadda, iyo dhisidda dhaqaale adkeysi leh.

Horumarinta lagu sameeyay maamulka maaliyadda guud iyo balaarinta ilaha dakhliga gudaha iyadoo la diiwaan geliyay 8 milyan oo doolar oo dheeri ah bishii Sebtembar waxay ka dhigan tahay in 56 boqolkiiba miisaaniyadda Dowladda Federaalka oo ah $340 milyan ee 2019 laga maalgelinayo dakhliga gudaha, inta soo hartayna ay bixinayaan deeq bixiyayaasha. Waxaan rabaa in aan ku bogaadiyo Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha oo hormuud u ah dadaallada Dowladda ee wax looga qabanayo musuq-maasuqa, oo ay ku jirto u madlidda 9-kii Diseembar in Dowladda Federaalka ay ansixiso Axdiga Qaramada Midoobay ee La-dagaalanka Musuqmaasuqa.

Haddaan u leexanno horumarka siyaasadeed, Qorshe-hawleedka Siyaasadda loo dhan yahay wuxuu khuseeyaa doorashooyinka, dib-u-eegista dastuurka, federaalaynta iyo dib-u-heshiisiinta. Kuwani waa qodobbada lagama maarmaanka u ah mashruuca dowlad-dhisidda Soomaaliya.

Hindise sharciyeedka doorashada ayaa loo gudbiyay Golaha Wasiirada, iyadoo wax ka bedel lagu sameeyay xisbiyada siyaasadda, bulshada rayidka iyo beesha caalamka. Dib u dhaca ku yimid u

gudbinta qabyo qoraalka sharciga doorashada baarlamaanka ayaa ka dhigan qodob muhiim ah oo la seegay sida ku cad ballan-qaadkii Dowladda ee ahaa in la meel mariyo sharciga doorashooyinka Disember 2018. Tani waxay saameyn suurtagal ah ku yeelan doontaa waqtiga geedi-socodka doorashooyinka. Si kastaba ha ahaatee, Guddiga Madaxa Bannaan ee Doorashooyinka Qaranka ayaa wali ku guda jira diyaar garowga diiwaan galinta codbixiyayaasha ka hor oo ay ka mid tahay qorista iyo tababarida shaqaale cusub, qorshaynta iyo asteynta goobaha diwaan galinta codbixiyayaasha, samaynta iyo hourmarinta xafiisyadooda heer qaran. Ilaa hadda waxa la diiwaan geliyay 35 xisbi siyaasadeed.

Iskaashiga farsamo ee geeddi-socodka dib-u-eegista Dastuurka ayaa sii socday, iyadoo dhidibbada u taagtay horumar dhab ah oo heer qaran ah. Guddiga Farsamada Qaranka ee heer Federaalka ayaa ka wada xaajoonaya heshiisyo siyaasadeed qabyo ah oo ku saabsan caddaaladda, wadaagga kheyraadka macdanta, awood qeybsiga, iyo federaaleynta maaliyadda.

Ka qaybgalka macnaha leh ee haweenka ee go'aamadan waa lama huraan. Xubnaha Madasha Haweenka ee Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka ayaa dhawaan shir sanadeedkii labaad u qabtay wakiilada haweenka ee golayaasha federaalka iyo dowlad goboleedyada, kaasoo looga hadlayay hanaanka dib u eegista dastuurka iyo u diyaar garowga doorashooyinka dalka.

Mudane Guddoomiye,

Iyadoo ay jiraan horumarradaas wanaagsan, ismari-waaga u dhaxeeya Dowladda Federaalka iyo Dowlad Goboleedyada ayaa weli ah mid hor-istaagaya horumar la taaban karo oo laga gaaro qeexida hannaanka federaalka, dhisidda hay'adaha dowlad-goboleedyada, iyo hirgelinta Hab-dhismeedka Amniga Qaranka.

Joojinta wada shaqaynta dawladda Faderaalka iyo Dawlad Goboleedyada ayaa waxaa ku dhawaaqay Golaha Iskaashiga Dawlad Gobolleedyada 8-dii Sibtember. Ka dib booqashooyin aan ku tagnay dhammaan gobollada aniga iyo Ergeyga Midowga Afrika, waxaa jiray dadaallo wanaagsan oo ay Soomaalidu hormuud ka tahay oo lagu soo celinayo xiriirka. Madaxweyne Farmaajo ayaa sidoo kale soo bandhigay wada hadal toos ah oo albaabada u xiran yihiin, waxaana bishii Oktoobar uu Ra'iisul Wasaare Khayre uu magacaabey guddi heer wasiir ah oo ka kooban lix xubnood, kuwaas oo Aqalka Sare kala shaqeynaya soo afjaridda ismari waaga jira.

Si kastaba ha ahaatee, muuqaalka guud waa uu cakiran yahay marka la eego hababka doorasho ee hadda ka socda dhawr dawladood oo xubin ka ah dawladda Faderaalka. Siyaasadda ummad kasta waa ku adag tahay, laakiin haddii ay noqoto mid weli jaan-goynaysa hab-dhaqankeeda, qaab-dhismeedka hay'adaheeda, haddana ka doodaysa waajibaadka haykalka dawladnimo ee ay ka tirsan tahay, waxay halis u tahay in kakanaanta siyaasadda ay u gudubto khilaaf.

Waxaan usoo joogney arrintan oo kale, intii ay socotay howlaha doorashada ee Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed. Eedeymaha la xiriira faragelinta dowladda Federaalka iyo rabshadaha ka dhashay xariga mid ka mid ah musharixiinta, horeyna u ahaa hogaamiye ku xigeenkii Al-Shabaab, ayaa wax u dhimay hanaanka doorashada, mana aha mid u wanaagsan geedi-socodka doorashooyinka ka dhici doonta gobolada kale iyo guud ahaan doorashada dalka ee

2020-ka. Tani waxay sidoo kale saameyn ku yeelan kartaa suurtagalnimada xubnaha mustaqbalka ka soo goosta al-Shabaab oo laga yaabo inay ka fikiraan inay ku beddelaan rabshadaha fikir siyaasadeed. Waa wax laga xumaado in 15 qof oo uu ku jiro xildhibaan ka tirsan baarlamaanka Dowlad Goboleedkaas ay ku dhinteen intii ay rabshaduhu socdeen.

Khilaafka u dhaxeeya Hay'adaha fulinta iyo sharci dejinta ayaa sidoo kale soo shaac baxay 9-kii bishii Disembar markii ay Xildhibaano ka tirsan Golaha Shacabka mooshin xil ka qaadis ah ka gudbiyeen Madaxweyne Farmaajo. Dhameystirka ajandaha dalbanaya sharci-dejineed wuxuu u baahan yahay wadashaqeyn joogto ah oo ka dhexeysa fulinta iyo sharci-dejinta. Khilaafka labada dhinac ayaa si weyn u hor istaagi kara horumarka Soomaaliya. Si kastaba ha ahaatee, waxaan soo dhawaynayaa horumarka dhawaan la gaaray ee ansixinta miisaaniyada 2019-ka iyo sharciga hawlgabka ee la horgeeyay baarlamaanka inta uu kal-gadhigiisa xirmin.

Waxaan si kulul u cambaareynayaa weerarkii hoobiyaasha ahaa ee labo maalmood ka hor lagu weeraray xarunteena iyo khasaaraha ka dhashay weerarkaas. Ma jiro wadan la ogol yahay in ay ka dhacaan weeraro ka dhan ah Qaramada Midoobay. Sida aad la socotaan, saddex ka mid ah shaqaalaheenna ayaa dhaawacmay, mid ka mid ah dhaawaciisa waa xooganyahay balse xaaladiisa nololeed waa garaab. Sidoo kale waxaa laga yaabaa inaad ka warqabto in mas'uuliyadda weerarkan ay sheegatay Al-Shabaab. Waxaan sidoo kale soo dhaweynayaa cambaareynta dowladda Federaalka ee weerarkaas.

Al-Shabaab ayaa weli ah isha ugu weyn ee amni darrada Soomaaliya. Inkastoo ay socdaan howlgallada lagu wiiqayo kooxda argagixisada ah, haddana waxay weli awood u leedahay inay weerarro aan loo meel dayin u geysato muwaadiniinta Soomaaliyeed, iyo inay beegsato ergada wax dooraneysa, ciidamada ammaanka Soomaaliya iyo kuwa AMISOM. Howlgallada AMISOM iyo ciidamada Soomaaliya ayaa ku guuleystay in ay Al-Shabaab u diidaan suurtagalnimada weeraro caadi ah. Waxay hadda ku tiirsan tahay Walxaha Qarxa iyo dilalka qorsheysan. Xusuusin, 9-kii Nofembar, al-Shabaab ayaa sheegatay mas'uuliyadda weerar culus oo lagu qaaday Hotelka Saxafi ee Muqdisho oo ay fuliyeen saddex baabuur oo walxaha qarxa laga soo buuxiyay. In ka badan 50 qof, oo ay ku jiraan toddobo ka tirsan al-Shabaab, ayaa lagu dilay weerarka.

Muqdisho iyo Puntland ayaa xubno taabacsan Daacish waxa ay beegsadeen ganacsato iyagoo u weydiinaya lacago baad ah oo ay ka qaataan dakhliga, isla markaana ay ka fuliyaan dilal qorsheysan. Waxay u muuqataa in sababta colaadda labada kooxood ee xagjirka ah ay hadda ugu horrayn tahay dan dhaqaale. Waxay hadda diiradda saarayaan baadda loogu yeero canshuur. Marka laga soo tago howlgallada ciidamada, waxaa muhiim ah in wax laga qabto arrintan iyo sidoo kale kaabayaasha ay al-Shabaab u adeegsadaan isku xirka qaraxyada.

Xoogaa horumar ah ayaa laga sameeyay dhismaha awoodda hay'adaha iyo laamaha amniga si wax looga qabto khatarahaas. Waxaa si habsami leh u socda barnaamijka diwaan gelinta kombuyuutarka (Biometric) ee ciidamada Xoogga dalka iyo Booliska Soomaaliyeed, waxaana socda qiimeynta u diyaargarowga howlgallada ciidamada dowlad goboleedyada, waxaana howlahan ay rajeynayaan in ay gacan ka geystaan naqshadeynta awoodaha dowlad goboleedyada ka hor inta aan mustaqbalka ciidamadan lagu biirin Dhismaha Amniga Qaranka.

Dhaqangelinta Qorshaha Kala-guurka waxa ay samaysay bilow dhiirri-gelin leh balse dhawaanahan ayaa dib u dhac ku yimid. Waxaana loo baahan doonaa in la helo hannaan qorsheysan oo aad u ballaaran oo isku dubaridan si loo gaaro goobaha hamiga ballaaran loo qabo ee xilliga kala guurka ku jira Qorshaha Kala-guurka ee Soomaaliya. Qorshaha kala-guurka waa in lagu hagaa ixtiraamka xuquuqda aadanaha, tallaabooyinka ku habboon xasilinta, dhammaan sida lagu heshiiyey Qorshaha Kala-guurka.

Guud ahaan, habka kala guurka waa inuu noqdaa mid ku salaysan xaalado iyadoo horumar laga gaarayo dhismaha hay'ado ammaan oo Soomaaliyeed oo waxtar leh, taasoo ah qodobka ugu muhiimsan ee marka la dejinaayo tallaabooyinka.

Waxaan sii wadnay taageerada xallinta khilaafaadka iyo dadaallada ka hortagga colaadaha ee qaybo badan oo dalka ka mid ah, annaga oo la kaashanayna asxaabta kale. IGAD iyo UNSOM waxay ku hawlanaayeen sidii ay u dejin lahaayeen xiisadda Tukaraq iyo sidii xal waara loogu heli lahaa colaadda u dhaxaysa Puntland iyo Somaliland. Natiijadii dadaalka dhex dhexaadinta wadajirka ah, xabbad-joojin ay cidi ka shaqeyn ayaa hir-gashey.

Dhanka siyaasadda gobolka, heshiiskii saddex geesoodka ahaa ee ay madaxda Soomaaliya, Itoobiya iyo Ereteriya ku kala saxiixdeen 6-dii Sebtembar ayaa fursad u ah Soomaaliya in ay xoojiso xiriirkeeda gobolka iyo in ay Soomaaliya taageero dheeraad ka hesho dhanka horumar dhaqaale, siyaasad iyo amni.

Mudane Guddoomiye,

Dhibaatada bini'aadannimo ee Soomaaliya ayaa weli ah midda ugu qalafsan uguna daba dheer adduunka. Colaadaha iyo qalalaasaha baahsan, iyo sidoo kale jhawareerka cimilada ee soo noqnoqda, waxay weli kor u qaadayaan heerarka sare ee baahida bini'aadannimo iyo welwelka difaaca. Iyadoo xaaladda bini'aadannimo ay soo hagaagtay marka loo eego sannadkii hore roobabkii Gu'ga ee celceliska ahaa ee ka sarreeyay sidii hore, haddana baahida ayaa weli ah mid sareysa, iyadoo 4.2 milyan oo qof ay u baahan yihiin gargaar iyo gabaad.

Kuwa u baahan adeegyada gargaarka iyo gabaadka, ku dhawaad saddex meelood laba meel waa carruur. Ku dhawaad 1.5 milyan ayay cunto yari ba'an haysaa marka ay jiraan xaalad adag ama xaalad degdeg ah. Ku dhawaad 2.6 milyan oo qof ayaa ku barakacay gudaha dalka.

Qorshaha ka falcelinta xaaladda bini'aadannimada ee 2019, ee lagu dhawaaqayo bishan, ayaa bartilmaameedsanaya 3.4 milyan oo qof, ama 81 boqolkiiba 4.2 milyan oo qof oo u baahan gargaar, taas oo si loo hirgeliyo u baahan $1.1 bilyan.

Mudane Guddoomiye,

Ixtiraamka xuquuqul insaanka iyo sharciga caalamiga ah ee bini'aadannimada iyo ilaalinta dadka rayidka ah waqtiyada colaadaha ayaa weli summad u ah Soomaaliya xilliga kala guurka iyo nabad

waarta. UNSOM ayaa diiwaan gelisay 1,384 dhimasho oo rayid ah sanadkan 2018, iyadoo 60 boqolkiiba tiradan ay al-Shabaab yihiin.

Horumar ayaa la sameeyay, oo ay ku jirto in la qaado tillaabooyin lagu dhisayo hay'ado ilaaliya xuquuqul insaanka, sida Guddiga Qarameedka Madaxa Bannaan ee Xuquuqul Insaanka. Waxaan ku dhiirigelinayaa Dowladda Federaalka inay dhameystirto aasaasidda Guddigaas.

Mudane Guddoomiye,

Soomaaliya waxa ay dhidibada u taagtay in ay horumar la taaban karo ku talaabsato sanadka 2019. Qorshayaashana waa ay diyaarsan yihiin, waxaana muuqda yoolka la hiigsanaayo. Maareynta doorashooyinka maamul goboleedyada ee sanadka 2019-ka iyo hannaanka siyaasadeed ee harsan, gaar ahaan dib u eegista dastuurka ayaa go'aamin doona in Soomaaliya ay horumar kale sameyso iyo in kale. Gaaritaanka yoolkan waxay u baahan doontaa in cid walba oo door ku leh ay arrintu u jiheeyaan isla jihada. Soomaaliya waxay dejisay jihadaas, waxaana rajeynayaa in sanadka soo socda la idiin soo gudbin doono warbixin ku saabsan horumarka.

Mahadsanidiin

###